

TAAGEERIDA ilmahaaga waxbaranaya INTA LAGU GUDO JIRO COVID-19

Inkastoo kala fogaanshiyaha wax lagu baranayaa ay yaraynayso faafitaanka COVID-19 bulshadaadana ay ilaalin doonto caafimaadkooda, waxa ay sidoo kale ku adkaysaa waalidka inuu helo adeegyadii uu ilmihisu sida caadiga uga heli jiray iskuulka.

Adiga iyo ardaygaagu ma aha inaad sannad dugsiyeedkan si kali ah u qaadataan, waayo adeegyada Degmada Multnomah waa ay ku taageeri kartaa adiga iyo ardaygaagaba inta wakhtigan adag lagu jiro.



Khayraadka
Daryeelka Caafimaadka

Degmada Multnomah iyo bulshada la hawlgalaysaaba waxa ay sii wadayaan in ay bixiyaan adeegyo badan si aad adiga iyo canuggaaguba u niyad samaataan iyada oo markaasi daryeelka caafimaad laydinka dhigi doono mid aad heli kartaan islamarkaasina ah mid aad dhaqaale ahaan awoodaan inta lagu gudo jiro cudurkan safmarka ah.

multco.us/supportingstudents/healthcare



Taageerada
Waxbarashada

Waxbarashada onlaynka ah waxa ay adkayn kartaa inaad ogaato sida aad ugu heli karto caawimo dheeraad ah ilmahaaga ama taageero qoyskaaga. Degmada iyo dhinacyada kale ee la hawlgalayaaba waa kuwo idiin diyaar ah si ay idiin caawiyaan adiga iyo ardaygaagaba inta lagu jiro sannad dugsiyeedkan kuwii hore ka duwan.

multco.us/supportingstudents/learning



Taageerada Dhaqaale
ee Qoysaska

Xasiloonaada gurigu muhiim ayay u tahay awoodda arday kasta uu wax ku baran karo uguna dulqaadan karo cudurkan safmarka ah qaab aan caafimaadkiisa waxba yeelayn. Kaalmooyinka dhaqaale ee Degmada Multnomah ee loogu talo galay kirada, biilasha iyo waxyaalaha kale ee loo baahan yahay waxa ay ka yarayn karaan werwerka iyo xasillooni darrada ay dareemayaan qoysasku inta lagu gudo jiro safmarka.

multco.us/supportingstudents/finances



Ilaalinta
Badqabka Ardayda

Kali la noqoshada dadka qaraabada ah waxa uu kordhin karaa khilaafaadka, dadka badanina waxa ay u baahan yihiin caawimo dheeraad ah si ay badqab iyo ammaan ula joogaan caruurtooda iyo lammaanayaashooda. Waxa jira dad aad kala hadli karto waxyaalaha kugu dhaca kuwaasoo kaa caawin kara inaad qorshayso badqabkaaga iyo ka qoyskaaga.

multco.us/supportingstudents/safety

multco.us/SupportingStudents

